# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

REF. JSL/DECM/249-599/122007 DATE 31/12/07

# DECREETO MADAXWEYNE NO:302/2007

**DHAQAN-GALKA XEER LR 38/2007**
**XEERKA Ka hortaga ku tagrifalka Hantida Qaranka**
**iyo La Dagaalanka Musuq-maasuqa**

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Ogolaanshaha Golaha Wasiirada ee Xeer Lr. 38/2007.

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka JSL.

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee ku suntan GW/KF-5/417/2007 ee 05/06/07 kuna ansixiyeen Xeer Lr.38/2007 ee Xeerka Ka Hortaga ku Tagrifalka Hantida Qaranka & La Dagaalanka Musuq-maasuqa

Markuu arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

### Wuxuu Soo Saaray

*Dhaqan-galka **Xeer Lr. 38/2007** ee Xeerka Ka hortaga ku tagrifalka Hantida Qaranka & La Dagaalanka Musuq-maasuqa oo lagu baahin-doono* ***Faafinta rasmiga ah ( Bulatino Officiale).***

Allaa Mahad Leh

Daahir Rayaale Kaahin
Madaxweyne

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

Ref: GW/KF-5/4/7/2007

Date: 5/6/2007

**Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Xeerka Ku takrifalka Hantida Qaranka iyo Ladagaalanka Musuq-Maasuqa**

**GOLAHA WAKIILADA JSL**

| | |
|---|---|
| **MARKUU ARKAY:** | Qodobka **77, 78** ee mashaariicda Sharci ee aan ahayn Maaliyada |
| **MARKUU ARKAY:** | Sixitaanka iyo toosinta la xidhiidha Mashruuc Sharcigan ee Madaxweynaha **JSL.** |
| **MARKUU DHEGAYSTAY:** | Talo bixinta la taliyayaasha Sharci ee **Golaha Wakiilada** kuna aadan Mashruuc Sharcigan. |

## WUXUU ANSIXIYAY

Mashruuc Sharcigan Xeerka ka hortagga ku takrifalka Hantida Qaranka iyo la dagaalanka Musuq Maasuqa ee Xeer **No:38/007** ka dib markii soo jeedinta **Madaxweynaha** ee ku aadan qodobka **13aad** ee **Xeerkan Goluhu** diiday haseyeeshee waxa uu waayay Codkii uu ku meel mari lahaa sidaas darteedna, iyada oo ay tirada Kooramku ahayd **(51) Mudane** waxay codayntii u dhacday sidan :- waxaa ogolaaday **(49) Mudane** waxaa ka aamusay **(1) Mudane,** cid diidayna ma jirto, **Gudoomiyuhuna,** muu codayn sida caadada u ah.

**ALLAA MAHADLEH**

**Maxamed Xassan Kaahin (Keyse)**
**Xog. Guud ee Golaha Wakiilada**

**C/raxmaan Maxamed C/laahi (Ciro)**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

# Xeerka Ka hortagga Ku Takrifalka Hantida Qaranka iyo la Dagaalanka Musuq-Maasuqa . Xeer No. 38/007

Golaha Wakiilada Xoghayaha

## JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Xeerka Ka hortagga ku Takrifalka Hantida Qaranka & La dagaalanka Musuq-Maasuqa Xeer No. 38/007

## Dib-u-Habaynta 1aad

### Golaha Wakiilada

**Markuu Arkey:** Qodobka 12aad faqradiisa 1aad ilaa 5aad, Qodobka 77aad ee Dastuurka Qaranka.

**Markuu Dersay:** Xeerka Ciqaabta Guud qodobadiisa 242, 245 iyo 366.

**Markuu Falanqeeyey:** Xeerka Golaha Wasiiradu u soo gudbiyeen G/Wakiilada ee dib-u- habaynta lagu sameeyey.

**Markuu Ogaadey:** Baahida loo qabo xeerkan kaas oo gundhig u ah ladagaalanka ku takrifalka hantida Qaranka iyo Musuq-Maasuqa ragaadiyay horumarka Ummadda.

**Markuu Tixgeliyey:** Doodii Mudanayaasha Golaha Wakiilada.

# Wuxuu Ansixiyey Xeerkan

Xoghayaha Wakiilada

## Qod. 1aad

### Macnaha Erey – Bixinta:-

Erayada ama weedhaha hoos ku qoran haddii aan si kale loo fasiran waxa xeerkan gudihiisa loo fasiranayaa sida soo socota :-

**Xatooyo, Lunsasho** : Waxa loola jeedaa Isticmaalka Hanti aanad lahayn oo lagugu aaminey ama aad masuul ka tahay in aad u isticmaasho si aan sharciga waafaqsanayn.

**Laaluush**: Waa bixin iyo qaadasho hanti, taas oo suurto gelinaysa si loo fuliyo hawlo aan sharciga waafaqsanayn.

**Ku Takrifal** : Waxa looga jeedaa isticmaalka iyo meelaysiga aan sharciga waafaqsaneyn ee hantida qaranka iyo tan gaarka ah.

**Musuq – Maasuq**: Waa hab ku salaysan farsamo iyo khiyaamo oo lagu hanto aduunyo ama derajo aanad u qalmin. Musuq – Maasuq nuxurkiisu waa xatooyo, laaluush iyo ku – takrifal cilmiyeysan.

**Hanti Guurta ah (Mobile Assets)** Waa shay ama qalab qiimo leh oo meesha aad doontid la tegi kartid ama u qaadi kartid, sida Baabuurta, Badeecadaha, Macdanta, Lacagta..............iwm.

**Hanti ma Guurto ah (Fixed Assets)** Waa maal ama qalab qiimo leh oo meel ku sugan oo aan qaadmi karin. Sida. Dhul, Warshad, Daar, Beer......iwm.

**Madaxda Sare ee Dawladda :-** Waxaa loola jeedaa, Gud. Bangiga Dhexe, Gud. Hayada Shaqaalaha, Xeer Ilaaliyaha Guud, Hanti Dhawraha Guud, Maareeyayaasha Hayadaha Madaxa Banaan, Agaasimayaasha Guud, iyo 3da Taliye Ciidan (Qaranka, Booliska, iyo Asluubta).

**Sarkaalka Guud** : **(Public Officer)** — Waxa loo la jeedaa qof kasta oo Masuuliyad shaqo qaran haya darajo kasta ha lahaadee.

**Documents Rasmi ah**: Waxa loola jeedaa qoraalada uu sameeyo ama uu sugo sarkaalka guud ama cid kale oo loo igmadey.

**Dheef**: Waxa loola jeedaa manfac cid kasta faaiido iyo waxtar u leh.

**Eex**: Waxa loola jeedaa ficil ay cadaalad daro ku jirto oo aan dhexdhexaad ahayn oo dhinac u xaglinaya.

## Qod. 2aad
## Xatooyo ku Takrifal ama Lunsi Hanti Qaran.

1. Masuulka guud ama qof loo xilsaaray hawl guud oo sabab xafiiska uu Masuulka ka yahay ama shaqadiisa ah ku haya ama kaga masuul ah lacag ama hanti guurto ah, ama ma guurto ah oo maamulka guud uu leeyahay oo ku takrifala ama leexiya si uu isagu dantiisa uga faa'ideysto ama uga faa'ideeyo qof kale ama in ka badanba isaga oo aan awood sharci u lahayn waxa la marinayaa ciqaabaha soo socda:-

   **b**) Waxa lagu ciqaabaya xadhig u dhexeeya **3** (Saddex) sano ilaa **10** (Toban) sano.
   **t**) Ganaax dhan S/L Shs. **1,000,000/=** (Hal Milyan).
   **j**) Lacagtii uu lunsadey oo uu soo celiyo.

2 Haddii hantida la lunsaday ama lagu takrifaley ay dhan tahay S/L Shs. **2,000,000/=** ilaa S/L Shs. **50,000,000/=** (Laba Milyan ilaa Konton Milyan S/L Shs.) waxa lagu ciqaabayaa xadhig u dhexeeya **6** sano ilaa **10** sano.

3. Haddii hantida la lunsaday ama lagu takrifaley ay dhan tahay S/L Shs. **50,000,000/=** (Konton Milyan) iyo wixii ka badan waxa lagu xukumaya **10 – 20** sanno.

4. Haddii la soo celin waayo hantidii la lunsaday waxa lagu bedelayaa xadhig u dhigma inta Hantida la lunsaday ay leeg tahay.

## Qodobka 3aad
## Waayidda. Xuquuqda Shaqaalanimo

1) Ciqaabta ku xusan Qod. **2aad** faqradihiisa **1aad**, **2aad** ilaa **3aad**, waxa ka dhalanaya in qof kasta oo ay Maxkamad horteeda kaga cadaato inuu danbiyadaas galay aanu xil danbe oo dawladeed qabanin inta cimrigiisa ka hadhay.
2) Qof kasta oo uu ku dhaco xukun Maxkamadeed oo kama danbeys ah oo ka dhashay ciqaabaha ku xusan Qod. **2aad** waxa uu waayayaa xuquuqdiisii shaqaalanimo mudadii uu shaqada hayey.
3) Sarkaalka guud ama qof kasta oo shaqaale ah haddii xadhiga lagu xukumey uu ka yar yahay **3** (saddex) sano waxa shaqada dawladnimo laga laalayaa muddo aan ka badneyn **2** (laba) sano.

## Qod. 4aad.
## Qoraalada Been Abuurka Ah

1) Sarkaalka guud ama qof kasta oo inta shaqada loo igmadey ku jiro sameeya qoraal been abuur ah ama qayb ka mid ah been abuura ama been ka sheega qoraal sax ah isago ujeedooyin gaar ah ka leh waxa lagu xukumayaa xadhig u dhexeeya **1** (Hal) sano ilaa **8** (Sideed) sano.
2) Qof kasta oo documenti lacag lagu qabto ama lagu bixiyo oo dawladdu leedahay si qaldan u isticmaala kuna lunsada hanti qaran waxa lagu xukumayaa ciqaabaha ku xusan Qod. **2aad** faqradihiisa **1aad**, **2aad** iyo **3aad** iyadoo laga qiyaas qaadanayo culayska hantida uu lunsaday hadba inta ay le'eg tahay.
3) Sarkaalka guud ee u xilsaaran hawl qaran ee u fududeeya ama gacan ku siiya ama si uun u suuro geliya mid ka mid ah xaaladaha ku xusan Qod. **2aad**, waxa lagu xukumaya ciqaabaha ku xusan isla Qod. **2aad** ee xeerkan.

**Qod. 5aad**
**Ku Takrifal Awood Xafiis**

Sarkaalka guud ama u xilsaarane hawl guud oo qaranku leeyahay ee leexiya ama carqaladeeya isaga oo ka faaiideysanaya awooda xafiiska uu masuulka ka yahay si uu dheef uga helo ama cid kale uga faaiideeyo oo aan si toos ah u hoos iman maamulkiisa waxa lagu ciqaabaya xadhig dhan **3** (Saddex) sano ilaa **8** (Sideed) sano.

**Qod. 6aad**
**Damiin**

1) Sarkaalka guud ama qof kasta oo loo soo xidho lunsi ama ku takrifal hanti qaran ha noqoto lacag cadaan ah (cash), jeegag, hanti guurto ah ama ma guurto ah derejo kasta ha lahaadee, waxa ka reeban :-

   b) In la damiinto haba yaraatee.
   t) Inuu xadhiga iibsado ama cid kale u iibiso.
   j) Inuu ka faa'iideysto cafis Madaxweyne.

**Qod. 7aad**
**Laaluush**

- Laaluush qaataha iyo Laaluush bixiyuhu waa isku danbi sharciga hortiisa.

1) Masuul kasta oo qaata laaluush ama aqbala ballanqaad nooc kasta ha ahaatee, ama u suurtogeliya qof kale inuu ku helo hanti ama dheef aanu xaq u lahayn si uu u fuliyo hawlo xafiiskiisa ah waxa lagu ciqaabayaa:-

   **b**) Xadhig aan ka badneyn **3** sano.
   **t**) Ganaax dhan S/L Shs. **5,000,000/=** ilaa **10,000,000/=**

2) Qof kasta derejo kasta ha lahaadee oo uu ku caddaado danbiga ku xusan faqrada **1aad** ee isla qodobkan waxa kale oo lagu ciqaabayaa:-

   **b)** Shaqadii uu qaranka u hayey oo laga eryo.
   **t)** Xuquuqdii shaqaalanimo oo uu waayo.
   **j)** Haddii uu bixin waayo lacagta ganaaxa ah waxa loogu bedelayaa xadhig u dhigma lacagta la ganaaxey.

3) Qof kasta oo lagu helo bixin laaluush qaab kasta ha u bixiyee waxa la marinayaa ciqaabaha ku xusan faqradaha **1aad** iyo **2aad** ee isla Qodobkan.

## Qod. 8aad
## Dayacaad Masuuliyad Qaran

1) Sarkaal kasta ama u xilsaarane masuuliyad qaran oo lacag ama dheef kale ku hela ama aqbala ballanqaad oo dayaca shaqo xafiiskiisa ah oo socotey ama ku kaca shaqo khilaafsan waajibaadka xafiiskiisa si ay dantiisa gaar ahaaneed u fusho waxa uu mutaysanayaa ciqaabahan:-

**b**) Xadhig dhan **2** (Laba) sano ilaa **5** (Shan) sano.
**t**) Ganaax dhan **3,000,000/=** ilaa **20,000,000/=.**
**j**) Haddii uu ganaaxa bixin waayo waxa loogu bedelayaa xadhig.

## Qod. 9aad.
## Kootarabaan/Khiyaamo

**1)** Ganacsade kasta oo badeecad aan cashuurneyn dalka gudihiisa soo geliya tab iyo xeel kasta ha isticmaale, oo la qabto waxay ciqaabtiisu noqoneysaa:-

**b**) Badeecada aan cashuurneyn ee la qabtay oo dhammanteed ay dawladdu la wareegto.
**t**) Ruqsada ganacsi oo laga laalo muddo **hal** sano ah.
**j**) Xadhig u dhexeeya **6** bilood ilaa **1** sano.
**x**) Ganaax dhan S/L Shs. **5,000,000/=** ilaa **10,000,000/=.**
**Kh**) Ganaaxa ku xusan faq. (**b**) ee isla qodobkan waxa loo kala qaybinayaa sidatan:-

- **60%** (Boqolkiiba Lixdan) waxa lagu shubaya khasnada dawladda.
- **40%** (Boqolkiiba Afartan) waxa lagu abaal marinayaa hayadihii ka hawlgaley sida Booliska, Xeer-ilaalinta, Shaqaalaha Maxkamada iwm.

**2)** Ganacsade kasta oo khiyaameeya saraakiisha cashuuraha ama been ka sheega nooca badeecadiisa si uu isaga yareeyo culayska cashuurta ku waajibtay, waxa lagu ciqaabayaa:-

**b**) Xadhig dhan **1** (Hal) sano ilaa **5** (Shan) sano.
**t)** Ganaax dhan **1,000,000/=** ilaa **5,000,000/=.**

2.Guddida Gobolladda & Degmooyinka.

Shirka gobollada iyo degmooyinka waxaa la qabanayaa saddex jeer sanadkiiba hadii aanay khasbin in la qabto kuwo aan caadi ahayn.

3. Habraaca shaqada.

a. Guddi kasta waxay yeelanayaan “Korum”.

b. Talada waxaa la goynayaa marka ay boqolkiiba (51% )ay joogan.

c. Hayadda NERAD waxay yeelaneysaa, Hantidhawre ka madax bannaan hay’adda oo sannadkiiba baadha hal mar, waxaaney raacayaan qaab xisaabeedka dawladda somaliland

d. Qaybinta macaawinooyinka waxa taladeeda leh Guddida Qaranka ee aafooyinka Degaanka, Gudidaas oo uu madax ka yahay Madaxweyne Ku xigeenku.

e. Hay’addu waa inay warbixin tafatirran sannadkiiba u qorto oo loo gudbiyo Xukuumadda iyo Baarlamaanka si ay ula socdaan Hay’adda hawlaheeda.

**Qodobka 9aad**
**Laalis**

Waxa allaale wixii Xeer ah, ee ka horimanayaa waa la laalay

**Qodobka 10aad**
**Dhaqan-gal**

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland saxeexo, faafinta rasmiga ahna lagu soo saaro.

C/Casiis Maxamed Samaale
Gud.Ku.Xigeenka 1aad ahna
Ku simaha Gudoomiyaha

Maxamed Xasan Kahin (Keyse)
Xog. Guud ee Golaha Wakiilada



10